



**UJEEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"**

Maanta oo ay taariikhdu tahay 19/01/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

<b>WAKAALAD BIXISO:-</b> FADUMO OMAR SH ABDULLAHI, Hooyo Nuro Xuseen Maxamuud, Somali ah, Ku Dhalatay: Kismaayo, Sanadkii: 02-02-1974, Sidata Warqadda Aqoonsiga, Lr. 27402027961117, Kana soo baxay Jamhuuriyadda Soomaaliya	<b>LA WAKIISHE:-</b> AHMED OMAR SH ABDULLAHI, Ina Nuro Xuseen Maxamuud, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 05-01-1988, Degan Hodan, Sita: Somali Passport, Lr. P01477894
<b>TILMAAMAHA DHULKA</b> Dhul Banaan oo Ku yaal: <b>Muqdisho</b> , Degmada: (Afgooye, Gaar ahaan nawaaxiga Ceelasha biyaha Soona Cadde-walaal), Cabirka: (20X20-Mt)-M, Lotoo No: 173, W.M.L: (Rep.N 6372/2016), Tr. 21/11/2016, Kana Soo Baxay Xafiiska Nootaayaha Afgooye, Uuna Saxiixay Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil)	<b>SOOHDINTA DHULKA</b> Bari: dhul dad, Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: jid


**B-** Aniga oo ah **FADUMO OMAR SH ABDULLAHI**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaalkay **AHMED OMAR SH ABDULLAHI** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihisu Sare Ku Xusan yihiin, in Dhulkaas uu gadi karo, Wareejin karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **AHMED OMAR SH ABDULLAHI** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **AHMED OMAR SH ABDULLAHI**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay **FADUMO OMAR SH ABDULLAHI**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA**

FADUMO OMAR SH ABDULLAHI

*Fadumo*



**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

1- HASSAN ABDI HASSAN

*Hassan*




**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

AHMED OMAR SH ABDULLAHI



2- ABDULLAHI MOHAMED HUSSEIN

*Abdullahi*



**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

REP. 1349/T.P.N/25, Tr. 19/01/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **FADUMO OMAR SH ABDULLAHI** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **AHMED OMAR SH ABDULLAHI** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

*Signature of Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"*









JA MHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA AFGOOYE

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN

Rep.n 6372/2016

Afgooye, maanta oo taariikhdu tahay 21/11/2016, anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Afgooye, xafiisna ku leh Ceelasha Biyaha, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan, dadkaasina waxay kala yihiin:

- 1) Mudane Cali Maxamed Cabdulle, hooyadiisna la yiraahdo Axado Dhiblaawe Beyle, ahna Soomaali, kuna dhashay Degmada Ceelbuur, lehna Baasaboorka Soomaaliya ee lambarkiisu yahay A01000843, ahna laga iibsadaha dhulka;
- 2) Marwo Faadumo Cumar Shiikh Cabdullaahi, hooyadeedna la yiraahdo Nuuro Macallin Xuseen Shiikh Maxamuud, ahna Soomaali, kuna dhalatay Magaalada Kismaayo, sanadkii 1974, ahna iibsatada dhulka.

Dadkaas dhulka kala iibsaday anigoo Nootaayo ahi markaan dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan. Mudane Cali Maxamed Cabdulle wuxuu Marwo Faadumo Cumar Shiikh Cabdullaahi ka iibiyey dhulkiisa ah 20x40, lana mid ah 800MQ, kuna qoran lambarrada: 171 iyo 173, kuna yaalla Degmada Afgooye, gaar ahaan nawaaxiga Ceelasha Biyaha soona Cadde-walaal, wuxuuna kaga iibiyey dhulkaas lacag dhan USD 8,400 (Siddeed kun iyo afar boqolo doollar) oo bannaan, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray laga iibsadaha dhulka, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaasi wuxuu ka mid yahay dhulka Mudane Cali Maxamed Cabdulle uu ku yeeshay qoraalka lambarkiisu yahay 117978/2013, taariikhdiisuna tahay 06/01/2013 ee uu qoray Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil). Dhulkaas waxay sohdimihiiisu yihiin sidatan: Waqooyi iyo Galbeed waxaa ka xiga jidad, dhinacyada kalena waxaa ka xiga dhulal dadeed, iibsataduna waxay caddaynaysaa inay soo aragtay dhulkaas, fiiro gaar ahna u soo yeelatay, inay la wareegtana ay diyaar u tahay. Sidaas daraaddeed, wuxuu laga iibsadaha dhulku qoraalkaan ku caddaynayaa inuu masuul ka noqon doono wixii ceebaal ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey, markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen.

- 1) Mudane Cali Maxamed Cabdulle
- 2) Marwo Faadumo Cumar Shiikh Cabdullaahi

SAXIIXA LABADA DHINAC

(libiye) \_\_\_\_\_

(libsato) \_\_\_\_\_

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

- 1) Mudane Xasan Xuseen Cali
- 2) " Cabdi Ibraahim Aadan
- 3) " Cabdullaahi Isaaq Cali

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Afgooye, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 5ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaan u akhriyey, kuna qanceen.



NOOTAAYO  
Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil)



**FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA**

**Tr. 25/01/2025**

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **AHMED OMAR SH ABDULLAHI** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1349/T.P.N/25, Tr. 19/01/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	AHMED OMAR SH ABDULLAHI
<b>La Wakiishay</b>	Dhul
<b>Cabirka</b>	20X20
<b>Ku Yaallo</b>	Muqdisho, Degmada Afgooye Gaar ahaan Nawaaxiga Ceelasha Biyaha Soona Cadde-Walaal
<b>Lotto Lambar</b>	173
<b>W.M.L</b>	6372/2016, Tr. 21/11/2016 Ka soo baxday Nootaayo TAFgooye
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	19/01/2025

**La Wakiishe:** Aniga oo ah **AHMED OMAR SH ABDULLAHI**, Leh Tel No. **616555507**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

**SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA**

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed**

**SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA**

**AHMED OMAR SH ABDULLAHI**